



Barida waayo-aragnimada Dadka Dhaladka ah ee Maraykanka

Dugsiyada Oregon, oo ay ku jiraan PPS, waxay diiradda saari doonaan doorka Dadka Dhaladka ee Maraykanku ku leeyihiin taariikhda Oregon, waxaa mahada leh sharciga ay ansixiyeen guddiga Sharci dejinta gobolka.

Sharciga Senate-ka 13, oo diiradda saara bixinta saxda ah, ee waxbarashada-meeleynta ku salaysan ee qabiilka ee guud ahaan gobolka, ayaa intii lagu jiray xagaaga waxaa sharci ka dhigay oo saxiixay Guddoomiyaha Gobolka ee Kate Brown. Wuxuu Waaxda Waxbarashada u farayaa in ay dejiso manhaj isla markaana bixiso tababar macallin oo la xiriira waayo-aragnimada Dadka Dhaladka ah ee Maraykanka ee Oregon.

Korinna Wolfe, oo ah Agaasimaha Sare ee PPS u qaabilsan waaxda Dariiqooyinka Badan ee loogu diyaar garoobaya Qalin jabinta 'Multiple Pathways to Graduation' ayaa ka marag kacday isla markaana u ololaysay Ardayda PPS taasi oo ahayd talaabo kasta oo ka mid ah intii ay hawshu socotay--laga soo bilaabo la imaanshaha ra'yigii sharciga ilaa laga gaarayay saxiixida guddoomiyaha gobolka.

"Taariikhdeena qabaa'ilku badanaa waa mid qarsoon," ayay sheegtay Wolfe. "Marka aan ka hadlayno waxbarashada Dadka Dhaladka ah ee ku qoran manhajkeena, dad badan ayaa farta ku fiiqa manhajka sheekada Raadkii Oregon "Oregon Trail" ee lagu dhigto fasalka 4-aad taasi oo laga eegayo aragtida ay qabaan dadkii dhulka degay."

Wolfe, iyo kuwa kale ee ku lug yeeshay guusha sharciga, waxay u arkaan SB 13 in uu yahay mid lagama maarmaan ah maxaa yeelay waa mid faraya in la baro taariikhda Dadka Dhaladka ah iyada oo laga eegayo aragtida ay qabaan bulshooyinka qabaa'ilku. Sharcigu wuxuu xaqiijinayaa in Waaxda Waxbarashada ee Oregon ay macallimiinta iyo bulshooyinka qabaa'ilka kala shaqayso dejinta manhaj-heer fasal u gaar ah.

Oregon waxay ahayd goob dowladda federaalku leedahay oo loogu talagalay dib u dejinta bulshooyinka Dhaladka ah ee Maraykanka iyada oo sababtu tahay taariikhdaasi dheer ee socodka federal ahaan waajibka laga dhigay, Oregon waa meel hoy u ah Bulshada Dhaladka ah ee Maraykanka iyada oo ah meeshaha sagaalaad ee ay ugu badan yihiin Maraykanka. Ku soo darida taariikhdaasi lagu soo darayo nidaamyada heerarkeena waxbarasho ee dadweynaha waa mid macno sameynaysa, ayay sheegtay Wolfe.

"Aqoonsiga doorka iyo jiritaanka aqoonta dadka dhulka loogu yimid u gaar ah oo ku aadan Oregon waxay bixin doontaa fursad lagu sharfo hababkeeda Dadka Dhaladka ahi wax u og yihiin ama wax u qabanayaan," ayay sheegtay Wolfe. "Aqoontani waxay bixin doontaa fursad lagu sharfo dhulka ay ardaydeenu wax ku bartaan, iyada oo lagu ogaan doono aragtiyaha kala duwan ee dhanka waxbarashada, isla markaana waxay sharfi doontaa aqoonta dadka dhulka loogu yimid iyo bulshooyinkeena qabaa'ilka ee firfircoon."